

# SABABTA KA QAYB QAADASHADA IMTIXAANKA GOBOLKA OO DHAN MUHIIMKA UGU YAHAY BARAYAASHA



OREGON  
DEPARTMENT OF  
EDUCATION

Oregon achieves . . . together!

## Sidee Bay Qaadashada Imtixaanaadka Gobolku Iiga Caawiyaan Inaan Taageero Ardaydayda?

- Wuxuu ku siiyaa macluumaad lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan horumarka la sameynayo muddo marka la joogo ee dhanka xirfadda luqadda Ingiriisiga, (ELA), xisaabta, iyo sayniska oo lala isticmaali karo ilo kale oo macluumaadka waxbarasho ah.
- Wuxuu bixiyaa oo laga helaa macluumaad ku saabsan awoodaha iyo meelaha loogu talagalay kobaca oo hagi kara isbeddelada dhanka manhajka iyo waxbarashada ee ELA, xisaabta iyo sayniska.
- Wuxuu gacan ka geystaa taageerada dadaaladaada si kor loogu qaado dhammaan ardaydaada oo la gaarsiiso rajooyin isku mid ah, xaqiijinta natiijooyin loo siman yahay oo loogu talagalay dhammaan ardayda Oregon.

## Sidee Bay Qaadashada Imtixaanaadka Gobolku U Caawiyaan Dugsigayga?

- Wuxuu ka caawiyaa in la aqoonsado isbeddelada dhanka waxbarashada, wuxuuna soo dhaweeyaa falanqeynta kooxaha ardayda ee ay dhici karto in aysan si fiican adeeg u helin ama laga yaabo in ay u baahdaan ilo dheeraad ah.
- Wuxuu lagu qiyaasaa barashada ardayda ee ELA, Xisaabta, iyo Sayniska, wuxuuna ardayda u saamaxaa in ay garowsadaan kobaca gobolka oo dhan ah ee dhanka guul gaarida ardayga iyo sidoo kale aqoonsiga dhinacyada hadafka ee looga baahan yahay in la wanaajijo meelahani nuxurka leh.

## Su'aalaha Inta Badan La Iska weydiyo oo ku saabsan Imtixaanaadka Gobolka

### Ardayda oo dhan miyaa looga baahan yahay in ay ka qayb qaataan imtixaanaadka gobolka?

Xeerka Arday Kastaa In Uu Guulaysto 'Every Student Succeeds Act' (ESSA) **wuxuu farayaa** ka qayb qaadashada dhammaan ardayda ee imtixaanaadka gobolka ee heerarka fasalka ee imtixaanka laga qaado (marka laga reebo faahfaahinta ku qoran [ORS 329.479](#) iyo [OAR 581-021-0009](#)).

Ardayda qabta naafanimada, ka qayb qaadashada imtixaanka waa mid sidoo kale uu u baahan yahay Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA).

### Imtixaanaadka gobolku miyay yihiin kuwa ay heli karaan ardayda oo dhan?

Inta badan ardaydu waxay qaataan imtixaanka gobolka ee guud. Qaar baa u baahan qorshayaal la sii dejiyay si ay u galaan imtixaanka, iyada oo kuwo yar oo ka mid ah oo qaba naafanimada dhanka garashada ah oo la taaban karo ay qaataan qiimeyn beddel ah.

- Wuxuu xaqiijiyaa in ilaha xaddidan ee gobolka iyo federaalka ee la qaybiyo si loo taageero dugsiyada inta badan u baahan.

## Sidee Bay Tahay In Dugsiyadu Si habboon U isticmaalaan Natiijooyinka Imtixaanka?

- Natiijooyinka imtixaanka gobolku waa kuwo lagu kalsoonaan karo oo gaarsiisan heerka kooxda arday ahaaneed waana in loo isticmaala in **lagu qiimeeyo sida wanaagsan ee manhajka iyo waxbarashadu** ay hab ku saleyan sanadle ugu daboolayaan baahiyaha dhanka waxbarashada ee dhammaan kooxaha ardayda. Isticmaalka xogta Warbixinta Diiradda la saarayo waxay udub dhexaad u tahay falanqeyntani.
- Fahamka dib u eegida natiijooyinka imtixaanka gobolka waa in ay keenaan in dugsiga **su'aalo wax weydiyaan**, ka fikirnaan waxa uu yahay macluumaadka dheeraadka ah ee ay u baahan yihiin si ay u taageeraan waxbarashada dhammaan ardayda.
- Qiimeynta ardayga gaar ahaaneed, helitaanka fursado waxbarasho (sida helitaanka dariiqooyin xisaabeed oo adag, Meelaynta Horumarsan, Shahaadada Caalamiga ah, ama barnaamijyada dadka Xirfadda iyo Hibada leh) waa in ay noqdaan kuwo ku saleysan **ilo badan oo caddeyn ah**.
- Isticmaalka natiijooyinka imtixaanka gobolka ee wada hadalada ku saabsan warbarashada ardayga. Waa in **aanan loo isticmaalin dejinta hadafyada macallinka ee gaarka ah** iyada oo qayb ka ah nidaamka qiimeynta macallinka.

## LA XIRIIR



[Bogga Internet-ka ee Kooxda Qiimeynta ODE](#)

Fadlan wixii su'aalo ah, faallooyin ah, ama talooyinka u soo dir:

[ODE.AssessmentTeam@ode.oregon.gov](mailto:ODE.AssessmentTeam@ode.oregon.gov)

Imtixaanaadka gobolku waxay qiyaasaan horumarka ardayga ee dhanka Xirfadda Luqadda Ingiriisiga, Xisaabta, iyo Sayniska. Waa in la tarjumaa oo kaliya iyada oo lagu darayo ilo kale oo caddeyn ah, sida natiijooyinka Ra'yi Ururinta SEED, natiijooyinka Ra'yi ururinta, natiijooyinka qiimeynta ku meel gaarka ah, jawaab celinta macallinka, kaararka warbixinta, iyo imaanshaha.

Imtixaanka gobolku wuxuu muuqaal guud ka bixiyaa sida **nidaamka dugsiga oo dhan** uu wax u qabanayo marka la eego meelaha muhiimka ah. Tani waxaa la isku wargeliyaa go'aanada wanaajin doona barnaamijyada wuxuuna ilo iyo taageero diirada la saarayo siiyaa dugsiiyo kala duwan.

*Ilaha Qiimeynta ODE*

*[Qiimeynta Saxda ee loogu talaqalay Ujeedada Saxda](#)*

*[Horumarinta Ilaha Qiimeynta](#)*

*[Ilaha Qiimeynta Ku meel gaarka ah](#)*

*[Ra'yi Ururinta SEED](#)*

*[Koorsooyinka Tababarka ee](#)*

*[Qiimeynta Waalidka ee](#)*

*[Akhriska/Qoraalka](#)*